

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 17.5-aad. Garowe 08 August, 2015

Lam.8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

**Ansixinta Xeerka qoondada qaaraanka dhismaha wadada
Ceel daahir – Ceerigaabo**

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.
Waxba ma leh**

**Sharci Lr 12. ee 08/08/2015, kuna saabsan Ansixinta qoondada
qaaraanka dhismaha wadada ceel daahir - ceerigaabo**



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr. 12 ee August 08, 2015, kuna saabsan ansixinta
Xeerka qoondada qaaraanka dhismaha wadada
Ceel daahir – Ceerigaabo**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad
XGGW/DPLS/46/2015 ee 13/07/2015;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka qoondada qaaraanka dhismaha wadada Ceel daahir – Ceerigaabo

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.


Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 46 /2015

Garoowe, Isniin

Date:- 13/07/2015

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Qoondada Qaaraanka Dhismaha Wadada

Ceeldaahir -Ceerigaabo

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobadiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha DPL
MW/DPS/203/2015 ee March-20-2015 kuna
saabsan Qoondada Qaaraanka Dhismaha
Wadada Ceeldaahir-Ceerigaabo

MARKUU TIXGELIYEY:-

In wadadani wax badan ka bedelayso
noloshada dadka, ganacsiga iyo isu socodka
Gaadiidka.

MARKUU DHEGAYSTAY:-


Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku
Ansixiyey kalfadhiga 35-aad fadhigiisii
19-aad ee 13/07/2015 Qoondada Qaaraanka
Dhismaha Wadada Ceeldaahir-Ceerigaabo

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Qoondada Qaaraanka Dhismaha Wadada Ceeldaahir - Ceerigaabo

GUUL EEBBE

Md. Siciid Xasan Shire



Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Tell:- +252 90 7796136 am +252 90 7798430

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
Wasaaradda Hawlaha Guud
iyo Gaadiida
Xafiiska Wasiirka



ولاية بنتلاند الصومالية
وزارة الأشغال العامة والنقل
مكتب الوزير

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
Ministry of Public Works and Transport
Office of the Minister

Ref:WHG&G/XW/54/2015

Garowe

Date:19, March, 2015

KU:- Golaha xukuumada ee DPL

Ujeeddo: Ogolaansho qoondada qaaraanka dhismaha wadada Ceeldaahir - Ceergaabo,

Mudane madaxwayne ,mudanayaal ,waxaa Guddiga qaaraan uruurinta dhismaha wadada Ceeldaahir - Ceergaabo, codsanayaan in loo ogolaado qaaraan u uruurinta wadada ,taas oo gudigu u qoondeeyay sida soo socota:-

Waxaa Guddigu isla gartay in wajiga koowaad la raadiyo lacag dhan \$ 2,000,000, (2Milyan) oo ka kala imaanaya :-

1. Shacabka Puntland (Ganacsatada,Gaadiidleyda iyo Ardayda) 70% = \$1,400,000
2. Dawlada Puntland iyo shaqaalaheeda 30% = \$ 600,000

Mudane madaxweyne,mudanayaal, halkaan waxaan idiinku soo gudbinaynaa soojeedinta guddiga ee qoondada dakhliga qaaraanka wajiga koobaad, waana sidan :-

S/n	Faahfaahin	Qoondada
B	Gaadiidka waaweyn iyo kuwa Yar-yar	
1	Gandhamaydle/N3/Tareel i.w.m (sadxedii bilood)	\$ 40.00
2	8 Boole/Waaraad/Booyad i.w.m (Sadxedii bilood)	\$ 20.00
3	Lankaruusal/Dhayne/Hilux/Bus/MarkII/Noha i.w.m (Sadxedii bilood)	\$ 10.00



T	Xoolaha iyo /Badeecada (Dhoofin iyo soodajin)	
1	Ari nool (Dhoofin)	\$ 0.25
2	Lo/Geel (Dhoofin)	\$ 1.00
3	Badeecada kale Dhoofin & Soo dajin (3% Canshuurta Dawlada)	
X	Telphonada	
1	Post Paid (Telfonada biilka lagu dalaco bishii)	\$ 1.00
2	Prepaid (Telfonada lacagta lagu shubto)	\$ 0.25
kh	Ardada	
1	Jaamacadaha semesterkii	\$5.00
2	Dugsiyada sare bishii	\$1.00
3	Dugsiyada hoose/dhexe bishii	\$0.5
D	Dhinaca Dawladda	
1	Shaqaalaha Dawladda in % loogu qaybiyo qoondo qaaraan bishii	\$100.000
2	Dakhliga guud ee Dawladda waxaa laga qoondeeyey bishii	\$ 200.000

Mahadsanid

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka .

C/rashiid Maxamed Xirsi

Wasaaradda HG&G, Garowe , Tell:2520907794790 ,Email Puntlandmopwt@gmail.com



10

The first part of the document discusses the importance of maintaining accurate records of all transactions. It emphasizes that every entry should be supported by a valid receipt or invoice. This ensures transparency and allows for easy verification of the data.

In the second section, the author outlines the various methods used to collect and analyze the data. This includes both primary and secondary data collection techniques. The primary data was gathered through direct observation and interviews, while secondary data was obtained from existing reports and databases.

The analysis of the data revealed several key trends and patterns. One of the most significant findings was the correlation between certain variables, which suggests a causal relationship. This finding is supported by statistical tests and is discussed in detail in the following paragraphs.

The final part of the document provides a summary of the findings and offers recommendations for future research. It suggests that further studies should be conducted to explore the underlying causes of the observed trends and to test the proposed hypotheses.